



«Dheehasho»

Miiska ku jira

Lambarkaaga Bulshada	1
Xadiditaanka Aqoonsiga	2
Hubi in diiwaanka lagaa hayo yahay mid sax ah	2
Bisinta Canshuurta Lambarka Bulshada	2
«Dhibcaha» Lambarka Bulshadav	2
Fahamka Macaashka Lambarka Bulshada	3
Macaashka Lambarka Bulshada	3
Hawlgabka	3
Naafanimada	3
Dhaxalka	3
Medicare	4
Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)	4
Goorma iyo Sidee ayaa loo codsadaa Lambarka Bulshada ama SSI	4
La Xiriirka Lambarka Bulshada	5

Daabacaddaan waxaa lagu soo bandhigayaa waxyaabaha ugu muhiimsan ee barnaamijyada Lambarka Bulshada, Dakhliga Kabitanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI) iyo Medicare. Wuxaad macluumaad gaar ah oo ku saabsan barnaamijyadaan aad ka heli kartaa, oo ay ka mid yihiin daabacaadaha aan soo saarno, adiga oo soo booqda bartayada internetka ee www.socialsecurity.gov.

Lambarkaaga Bulshada

Macaashka aad ka hesho Lambarka Bulshada waa mid ku saleysan warbixinta dakhliga ee aan ka helno halka a ad kla shaqeysyo (ama adiga, haddii aad iska u shaqeysato) iyada oo la isticmaalayo lambarka bulshada. Sidoo kale, waa in aad xaqijiisaa in magaca aad shaqada ku isticmaasho uu la mid yahay kan ku qoran kaarla Lambarka Bulshada. Haddii aad

waligaa bedesho magacaaga, waa in aad sidoo kale bedeshaa magaca kuugu qoran kaarka Lambarka Bulshada. Adeeggan waa mid lacag la'aan ah. Waa in aad caruurtaada u smeysaa lambarka bulshada marka ay dhashaanba. Waad u baahan lambarkooda si aad u sheegato in ay yihiin ilamahaaga si aad ilmahaaga ugu xareysato.

Xadiditaanka Aqoonsiga

Waa in aad ka taxadartaa kaarka Lambarka Bulshada si aad uga hortagto xaditaanka aqoonsiga. Kaarkaaga tus halka aad ka shaqeysyo marka aad shaqo cusub bilowdo si sax ah loogu diiwaangeliyo. Ka dibna, ku xafid meel amaan ah. Ha ku qaadin jeebka ama boorsada.

Hubi in diiwaanka lagaa hayo yahay mid sax ah

Waa muhim in magacaaga iyo Lambarka Bulshada ee ku qoran kaarka lagu siiyeyay **la mid yihiin** kuwa aad ku qaadato mushaharka iyo foomka W-2 si aan si sax ugu diiwaangelino dhibcaha macaashka. Haddii uu qalad ku jiro Lambarka Bulshada, la xiriir xaiiska Lambarka Bulshada si loo saxo. Hubi in foomka W-2 ee shaqada uu sax yahay, haddii aanu sax aheyn, u gudbi goobta shaqada maclumaad sax ah.

Waxa sidoo kale lacagta aad shaqeysyo aad ka ogaan kartaa *Warbixinta mbarka Bulshada (Social Security Statement)*. Warbixinta waxaa *laga heli karaa barta internetka ee dadka shaqeeya oo da'doodu ka weyn tahay 18 jir*. Si aad u aragto warbixintaada, soo booqo www.socialsecurity.gov/myaccount oo ka sameysyo xisaabta *my Social Security*. Haddii Warbixinta aysan ku jirin dhamaan dakhliga ku soo galay ama aad ku aragto qalad, goobta shaqada iyo xafiiska kuugu dhow ee Lambarka Bulshada la socodsii.

Bisinta Canshuurta Lambarka Bulshada

Haddii aad cid kale u shaqeysyo, goobta shaqada ayaa kaa goyneysa canshuurla Lambarka Bulshada iyo Medicare una diraya Waaxda Adeegga Canshuuraha (IRS). Goobta shaqada waxa ay sidoo kale IRS u soo dirtaa lacag la mid ah tan laga gooyey mushaharkaaga. Goobta shaqada ayaa u soo gudbisa dhamaan dakhliga ku soo gala Lambarka Bulshada.

Haddii aad iska u shaqeysato, waxa aad bixisaa canshuurta Lambarka Bulshada iyo Medicare marka aad diiwaan gelineysyo canshuurta ka dibna IRS ayaa la socodsiisa dakhligaaga Lambarka Bulshada. Waxa aad bixineysaa lacag u dhiganta tii lagaa goyn lahaa iyo tii ay goobta shaqadu ku dari laheyd, laakiin waxaa laga goynayaa dakhliga gaarka ah kaasoo laga jarayo canshuurta lagugu leeyahay.

Lacaga lagaaga jaro Lambarka Bulshada iyo Medicare si gaar ah adiga meel laguuguma keydiyo. Waxaa lagu siiyaa dadka qaadanaya macaashka ee maanta, sida macaashka mustaqbalka lagu siinayo ay u bixin doonaan dadka shaqyn doonaan mustaqbalka.

«Dhibcaha» Lambarka Bulshada

Marka aad shaqeyneso oo aad bixineysyo Lambarka Bulshada, waxa aad heleysaa dhibco kuwaas oo ah kuwa aad xaqa ugu yeelnayso macaashka Lambarka Bulshada (taasoo ku xiran lacagta aad shaqeysyo, sanad kasta ilaa afar dhibcood ayaad heli kartaa) Dadka intooda badan waxa ay u baahan yihiin in ay shaqeeyaan 10 sano (40 dhibcood) si ay xaq ugu yeeshaan macaashka. Dadka da'da yar waxa ay u baahan yihiin dhibco intaas ka yar si ay xaq ugu yeeshaan macaashka naafanimada ama qoyskoodu ugu yeesho macaashka dhaxalka.

Fahamka Macaashka Lambarka Bulshada

Guud ahaan, macaashka Lambarka Bulshada waa boqolkiiba tiro ag ee lacagta aad shaqeysyo inta aad noosahay. Shaqaalaha dakhligoodu yar yahay waxaa la siiyaa tiro boqoleey ah ee mushaharka celcelis ahaan soo gala noloshooda oo ka duwan dadka dakhligoodu sareeyo. Qofka shaqaalaha ee meel dhexe ah waxa auu filan karaa macaash hawlgab oo u dhigma 40 boqolkiib mushahrkii noloshiisa soo galay.

Lambarka Bulshada marna looguma talo gelin in ay noqoto dakhliga kaliya ee ku soo gala marka aad hawlgab noqoto ama u noqda qoyskaaga haddii aad dhimato. Waxaa loogu talo galay inuu kabitaan u noqdo keydkaga, maal gelintaad, hawlgabka sahqada, iyo qorshaha ceymiska.

Macaashka Lambarka Bulshada

Canshuurta Lambarka Bulshada waxa ay bixisaa sdex macaasha;: hawlgabka, naafanimada iyo dhaxalka.

Haddii aad xaq u leedahay hawlgabka ama naafanimada, waxaa suurtgal ah in qoyskaaguna sidoo kale ay helaan macaash. Tusaale ahaan, xaaskaaga/saygaaga waxaa suurogal in uu xaq u yeesho haddii da'diisu ugu yaraan tahay/yahay 62 jir. Xaaska/sayga waxaa kale oo suurogal ah in ay xaq u yeeshaan haddii ay ka yar yihiin 62 laakiin korinayaan ilmo aad dhashay oo ka yar 16 (ama 16 jir ah ama ka weyn laakiin naafo ah) xaqna ugu yeelanaya diiwaankaaga. Caruurtaada aan weli guursan xaq bay iyaguna u yeelanayaan haddii ay ka yar yihiin 18, da'doodu tahay 18-19 oo ay dhigtaan dugsi dhexe ama sare si buuxda, ama ka weyn 18 sano oo naafo ah. Haddii aad is furteen, saygaaga/xaaskaaga hore waxaaa laga yaabaa in ay xaq u yeelato/yeesho macaashka kuu diiwaan gashan.

Hawlgabka

Macaash buuxa waxa aad ku heleysaa da'da buuxda ee hawlgabka (macaash dhimanayaad heli kartaa xilli hore oo 62) haddii aad shaqeysaneysay muddo kugu filan. Haddii aad dhalatay 1944 ama ka hor, waxa aad iminkaba xaq u leedahay macaashka buuxa ee Lambarka Bulshada. Dadka dhashay 1945kii ilaa 1954kii da'da ay hawlgab buuxa ku noqon karaan waa 66. Da'da hawlgabka buuxa waa ay kordheysaa si tartiib tartiib ah sanad kasta ilaa gaarto 67 dadka dhashay 1955 ilaa 1960kii. Da'da hawlgabka buuxa dadka dhashay wixii ka dameeyay 1960kii waa 67. Haddii aad dib u dhigto wixii ka dambeeya da'da hawlgabka buuxa, waxaa lagu siinayaah dhibco gaar ah bil kasta oo aad macaashka qaadan ilaa aad ka gaartom 70. Haddii aad go'aan ku gaarto in aadan dib u dhigan wixii ka dambeeya 65, waa in aad iska diiwaan gelisaa Medicare sadex bilood gudahood marka ay kuu buuxsanto 65 sano.

Naafanimada

Waxa aad xaq u yeelaneysaa macaashka naafanimada haddii aad shaqeysyo muddo dheer oo aad ku heshay dhibco kudu filan ama aad haafu noqotay ama aad madaxa ka jiran tahay kuwaas oo kuu diidayaa in aad shaqeysyo ugu yaraan muddo sanad ah, ama aad qabto xanuun aadan ka soo bogsaneyn. In go'aan laga gaaro codsiga naafanimada bilo ayey qaadataa, oo ha sugin in aad shaqada ka maqnaato muddo sanad ah si aad u codsato macaashka naafnimada.

Dhaxalka

Haddii aad dhimato ka hor inta aanay qoyskaaga, waxaa laga yaabaa in dadka aad ka tagto qaarkood ay xaq u yeeshaan macaash. Waxaa ka mid ah haweenta sayga/xaaska aad ka dhimato (sayga/xaaska is furay), caruurtaada iyo waalidka kula nool.

Medicare

Macaashka caafimaadka waxaa lagu bixiyaa afarta qeybood ee Medicare. Canshuurta Medicare ee aad bixiso inta aad shaqeyneyso ayaa lagu maal geliyaan Medicare ee Qeybta A (ceymiska cisbitaalka) taasoo caawisa bukaanka ku jira isbitalada iyo goobaha leh kalkaaliyaasha caafimaadka iyo adeegyada kale. Inta badan, waxa aad bixisaa lacagta bil kasta sadexda qeybood ee Medicare. Medicare Qeybta B (ceymiska caafimaadka) waxa ay bixisaa adeegga dhakhtarka, bukaanka soo booqda isbitalka ama adeegga kale ee caafimaadka. Medicare Qeybta C (Medicare Advantage) waxa uu ogolaanayaa dadka heysta Qeybta A iyo B in ay helaan adeegga caafimaadka ee ay bxixyaan mid ka mid ah hay'adaha u adeegga. Medicare Qeybta D (ceymiska Medicare ee daawada) waxa uu bixiyaa ceymiska daawada.

FIIRO GAAR AH: *Waa in aad iska diiwaan gelisaa Medicare xitaa haddii aadan ku talo jirin in aad hawlgab ku noqoto 65. Haddii aadan iska diiwaangelin Qeybta B iyo Qeybta D markii ugu horeysay ee aad xaga u yeelatay, waxaa suurogal ah in aad bixiso ganaax inta aad heysato ceymiska Qeybta B iyo Qeybta D. Sidoo kale, waa in aad sugtaa is diiwaangelinta, taasoo dib u dhigeysa ceymiskaaga.*

Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)

Si aad u hesho SSI, waa in da'daadu tahay 65 ama ka weyn, indho la'a ama naafo ah. Waa in aad keentaa caddeyn muujineysa in dakhligaagu yar yahay oo waxa ku soo gala aanay ku fileyn bixinta kharashkaaga. Waxaa suuro gal ah in caruurta iyo dadka waaweynba xaq u yeeshaan SSI.

Lacagta SSI ee la bixiyo waxa ay ku xiran tahay dakhliga, hantidaada iyo halka aad ku nooshahay. Dawladda dhexe waxa ay bixisaa macaasha aasaas ah gobolada qaarkoodna lacag ayey ku daraan. La xiriir xafiiska degaanka ee Lambarka Bulshada si aad u ogaato

lacagaha SSI ee gobolkaaga. Guud ahaan, dadka la siiyo SSI waxa kale oo ay heli karaa ceymiska Medicaid, Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada (SNAP) iyo gargaar kale.

Weli waa lagu siin karaa macaashka SSI haddii aadan shaqeyn. Dakhliga guud ee casnhuurta ayaa laga bixiyaa SSI ee ma aha lacagta Lambarka Bulshada.

Goorma iyo Sidee ayaa loo codsadaa Lambarka Bulshada ama SSI

Waa in aad codsataa macaashka hawlgabka sadex bilood ka hor taariikhda aad dooneysyo inuu macaashku kuu biloowdo. Haddii aadan diyaar u aheyn in aad hawlgab noqoto, ama aad ku fikireyo in aad mustaqbalka dhaw noqoto hawlgab, waxa aad soo booqan kartaa bogga internetka ee Lambarka Bulshada. Haddii aad heysato dhibco kugu filan ee aad macaashka xaq ugu yeelenayso, waxa aad isticmaali kartaa *Qiyaasaha Hawlgabka (Retirement Estimator)* ee www.socialsecurity.gov/estimator.

Qiyaasaha hawlgabka waa mid munaasib ku ah, amaan ah, oo si dhaqso ah loogu adeegsn karo qorsheynta maaliyadeed taasoo ku ogolaaneysa in aad abuurto tusaalooyin ku saabsan «maxaa dhacaya haddii aan» Haddii aadan heysan dhibco kugu filan oo macaashka aad xaq ugu yeelato, waxaa jira xisaabiyyaha macaashka oo aad ka heli karto www.socialsecurity.gov/planners. Waxaa kale oo codsiga macaashka hawlgabka ama naafanimada aad ku soo gudbin kartaa www.socialsecurity.gov.

Waa in aad codsataa Lambarka Bulshada ama Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada, naafanimada haddii aadan awoodi karin in aad shaqeyso. Xaaladaha intooda badan, waxa dhamaan codsiyada naafanimada ka buuxin kartaa barta internetka. Haddi qofka qoyska u shaqeynayey dhinto, waa in aad nala soo ciriirtaa si aad u ogaato in adiga iyo qoyskaaga ay xaq u leeyihii macaashka.

Marka aad codsato macaashka, waxaa laga doonayaa aqoonsiyada caddeynaya in aad xaq u leedahay. Waxaa lagaa doonayaa shahaadada dhalashada qof kasta oo qoyska ka tirsan oo codsanaya, shahaadada guurka ee xaaskaaga/sayaaga codsanaya, iyo foomka W-2 ee ugu dambeeyey (ama casnhuurta aad xareysay haddii aad iskaa u shaqeysato).

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawl gabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqlu ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;

- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Wuxaanu idii heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tiihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Wuxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihii ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Wuxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-10006-SO | July 2017
«Dheehasho»

A “Snapshot” (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha